

## **Xeerka Anshaxa iyo Edbinta Ardayga**

### **Hordhac**

- A. Degmada ayaa go'aamiso isticmaalka cadeynta ku saleysan, dhaqamada naxdinta xog ogaalka ah ee yareyso waqtiga waxbarashada ee arday walba iyo yareyso isticmaalka edbinta ka ceeyrinta. Degmada waxay dooneysaa inay dhisto faham guud oo ku saabsan faafitaanka dhaawacyada iyo saameynta aqoonsataa in waayo aragnimada naxdinta ay si xun u saameyn karto dabeecada ardayga iyo in dhaqamada edbinta ay dib u naxdin gelinayo ardayda. Dugsi iyo barnaamij walba waa inay abuuraan jawi badqab leh, degan, oo ammaan ah taasoo ardaydoo dhan ay dareemaan in lagu daro, la taageero, oo la ixtiraamo. Si taas loo gaaro, go'aan gaarista edbinta waa inay ku jirtaa aragtida naxdinta xog ogaalka ah oo marka hore diirada la saaro dhaqamada soo celinta. Marka dabeecada ardayga at carqaladeyso jawiga waxbarashada ama shaqada, shaqaalaha dugsi, qoysaska, iyo ardayda waxay wadaagayaan walaacyada oo waxay si wadajir ah uga shaqeynayaan inay u hormariyaan oo u hirgeliyaan qorshooyin loo siman yahay oo soo celin ah ee loogu talloagalay waxqabadyo iyo taageerooyin dheeraad ah oo degdeg ah

Degmada waxay aaminsantahay in kuwa xiggo ay yareyneyso baahida tallaabooyinka edbinta ee ka reebta ardayda fasalkooda:

1. Jawiga dugsi wanaagsan
  2. Filashooyinka dabeecada ardayga oo cad isna waafaqsan
  3. Xeeladaha maareynta naxdinta xog ogaalka ah iyo fasalka wax ku ool ah
  4. Ka qeybgalka waalidka/qoyska/masuulka
  5. Waxbarashada quseyso dhaqanka
  6. Dhaqamada hormar ahaan ku haboon
- B. Edbinta waa in loo isticmaalaa in lagu taageero ardayda waxbarashada xirfadaha iyo aragtiyada muhiimka u ah in la xoojiyo jawiga dugsi wanaagsan laga fogaado dabeecada carqaladeynta. Istickmaalka qaabka naxinta xog ogaalka ah ee edbinta dugsi oo ay wehliso waxbarasho iyo tilmaamo macno leh oo la heli karo ayaa siiso ardayda fursada ay wax uga bartaan qaladaadkooda oo ay wax ugu biiriyaan bulshada dugsi. Tan waxay u badantahay inay keento in ardayga dib loogu soo celiyo waxbarashada. Degmadaan wak.6 (o)10 2 (an w)13CjdT[9 (g)-11h0-ua di( Kabciso isku kalsoonaanta
- Dhiirogeliso ka qeybgalka firfircoon ee bulshadooda

Kormeeraha guud ama wakiilka ayaa la shaqeynayo dugsiyada iyo barnaamijyadoo dhan si ay u fuliyaan dhaqamaha cadeynta ku saleysan, dhaqamada naxdinta xog ogaalka ah iyo xeeladaha lagu joogteynayo jawi dugsi badqab leh, degan, oo ammaan ah. Xeeladaha waa inay diirada saaraan:

-

- Baabi'inta isticmaalada aan dheelitirneyn ee tallaabooyinka
- Dib u eegista joogtada ah iyo hagaajinta dhaqamada edbinta
- Kobcinta isticmaalka macalimiinta ee xeeladaha maareynta naxdinta xog ogaalka ah iyo fasal waxtar leh



## **Mabaadi'da Edbinta**

- A. Edbinta waa inay ahaataa jawaab simman, daah furan, waqtiyeysan, cadaalad ah, oo hormar ahaan ku haboon sida ku saleysan baahiyaha ardayga gaarka ah sida lagu qeexay ORS 339.250.
- B. Dhaqamada edbinta waa inay joojiyaan dabeecada aan loo baahneyn ka hor intaysan dhicin, oo ay isticmaalaan waxqabadyada wax tarka leh kadib markii ay dhacaan, iyagoo raadinaya xalinta waxyeelo walboo ay keentay.
- C. Degmada iyo dugsiyada waa inay sameeyaan dadaal walboo macquul ah oo marka koowaad lagu saxayo dabeecada ardayga ee aan loo baahneyn iyadoo loo marayo

